

Su'aalaha Inta badan la iska weydiiyo Dalabka Onleenka ah

SU'AAL: Waa kuwee bakhaarada cuntada ee laga heli karo dukaamada onleenka ah ee WIC?

Jawaab: Wakhti xaadirkaan, kaliya bakhaarada Walmart ee Washington ku yaala ayaa bixiya adeegyada dukaamaysiga onleenka ah ee WIC.

Su'aal: Kuwaan ma ku jiraan Walmart Neighborhood Markets iyo Walmart Supercenters?

Jawaab: Dhammaanba goobaha Walmart ee Washington ku yaala WIC waa ay ogoshahay.

Su'aal: Kuwaan ma kujiraan bakhaarada Walmart ee ku yaala gobolada dariska ah ama magaalooyinka xaduudaha ku yaala?

Jawab: Waxaa jira hal bakhaar oo Walmart leedahay oo magaalo xaduud ku taala ku yaala kaasoo la ogolyahay oo aan gobolka Washington ku oolin (Warrenton, OR).

Su'aal: Qoysaska WIC ma looga baahanyahay inay ciwaan ka samaystaan Walmart si ay onleenka uga dukaamaystaan?

Jawab: Haa, talaabada koowaad ee dukaamaysiga onleenka ah waa inaad samaysato ciwaan dukaamaysi. Ma jiro kharash kaaga baxaya samaysashada ciwaanka.

Su'aal: Sidee ula soo degi karaa ablikeeshinka Walmart?

Jawab: Isticmaal mid kamid ah linkiyada hoose si aad ula soo degto ablikeeshinka Walmart.

- Apple Store: [Appyada Walmart oo kujira App Store](#) (Ingiriisi ah; luuqado kale ayaad ka heli kartaa)
- Google Play: [Walmart: Shopping & Savings – Appyada ku jira Google Play](#) (Ingiriisi ah)

Su'aal: Sidee ayaan ku ogaan karaa cuntooyinka WIC ogoshahay ee Walmart kujira?

Jawab: Barta [Walmart.com](#) (Ingiriisi ah) ama ablikeeshinkaaga Walmart app waxaad iticmaali kartaa qaybta baarista si aad uga raadsto cuntooyinka WIC. Tusaale ahaan, haddii aad raaadinayso caano ay WIC ogoshahay, waxaad ku qoro kartaa “WIC Milk, (Caanaha WIC)” qaybta wax laga baaro. Cuntooyinka ay WIC ogoshahay waxay kuugu soo baxayaan qoraal ah “**WIC Eligible, (WIC way Ogoshahay)**” Waxaad sidoo kale iibsan kartaa kaliya cuntooyinka ay WIC goshahay adiga oo isticmaalaya **Shop your WIC benefits (Ku adeego dheefahaaga WIC)**, kuwaas oo hadda kujira liiska cuntooyinkaaga WIC.

Su'aal: Wali onleenka ma ku adeegan karaa haddii aan iska badalo kaarkayga WIC?

Jawab: Haa, waxaad iska tirtiri kartaa kaarkii hore ee WIC ee ciwaankaaga Walmart ku jiray, kaddibna waxaad gashan kartaa lambarka kaarkaaga cusub.

Su'aalaha Inta badan la iska weydiyo Dalabka Onleenka ah

SU'AAL: Sidee ayaan lacagta ugu bixinayaa kaarkayga WIC marka aan si onleen ah uga adeeganayo Walmart?

Jawab: Gal akoonkaaga Walmart (onleen ah [Walmart.com](https://www.walmart.com) (Ingiriisi) ama ablikeeshinka Walmart app) kaddibna riix “**Add new payment method (Geli qaab cusub oo lacag bixin ah)**” ama “**Add payment card(Geli kaarka lacag bixinta).**” Geli lambarka kaarkaaga WIC iyo lambar-sireedka WIC. Marka aad booqato, websaytku wuxuu ku weydiin doonaa inaad geliso lambar-sireedkaaga WIC mar labaad.

SU'AAL: Ma ku iibsana karaa cuntooyinka WIC iyo kuwa aan ahayn WIC iskumar?

Jawab: Haa, waxaad kaarkaaga WIC u isticmaali kartaa cuntooyinka WIC ee aad doorato kaddibna waxaad u isticmaali kartaa qaab kale oo aad iskaga bixiso lacagta cuntooyinka aan WIC ahayn ama waxyaabaha kale.

Su'aal: Ma waxaan bixinaya kharashka keenista/soo rarista marka aan iibsanaayo alaabta WIC?

Jawab: Haa, waa inaad bixisaa kharashka keenista haddii aad doorato habka keenista. WIC kaama daboolayso kharashka keenista/rarista. Haddii aad tahay xubin kamid ah Wal-Mart + keenista/raristu waa bilaash. Majiro kharash laga qaadayo kasoo qaadista dukaamada. Ma ahan in dhammaan ciwaanada WA ay u qalmaan keenista.

Su'aal: Maxaa dhacaya haddii aan lambar-sireedkayga u galiyo qaab khaldan websaytkuna iga saaro Walmart.com?

Jawab: Kaddib marka aad si khaldan afar jeer u galiso lambar-sireedka, Walmart.com wuxuu kaa saarayaa akoonka ilaa laga gaaraayo saqda dhexe ee habeenka maalintaas. Haddii ada jeceshahay inaad lambar-sireedkaaga badasho, wac lambarka ku qoran xaga dambe ee kaarkaaga WIC.

Su'aal: Liiska dheefahaygu ma isbadalayaa sida ugu dhakhsaha badan marka aan dalabkayga galiyo?

Jawab: Haa, haraagaaga dheefta waxaa wax iska badalayaan islamarkiiba marka aad dalabka gashato.

Su'aal: Qoysaska WIC ma kala badalan/badali karaan cuntooyinka WIC ogolaatay?

Jawab: Haa, qoysaska WIC waxay “Start a Return (Bilow Celinta)” si onleen ah si ay u kala badashaan alaabta WIC ogoshahay ee iskumidka ah. Waxay sidoo kale tagi karaan miiska adeega macaamiisha ee Walmart si ay u bilaabaan wax kala badalashada. Wax kala badalashada u dhow

Su'aalaha Inta badan la iska weydiyo Dalabka Onleenka ah

maalinta dheeftaada ugu danbaysa waxaa laga yaabaa inaysan kuu saamixin wakhti diyaarin oo ku filan.

Su'aal: Qoysaska WIC lacag ma loo celinayaa marka alaabtu aysan oolin sidii lagu balamay?

Jawab: Haa, Qoysaska WIC waxay dooran karaan alaab kale marka ay onleenka ka adeeganayaan. Haddii alaabta aan la heli karin, shay kale oo badalana aadan dooran, alaabta aan la heli karin waxaa lagu soo celin doonaa akoonka dheefta ka qaybqaataha si uu mar kale u iibsado.

SU'AAL: Lacag miyaa la iigaga qaadi doonaa bacaha?

Jawab: Maya, lagaama qaadi doono lacagta bacaha marka aad dalab onleen ah gudbisanaysid adiga oo adeegsanaya Kaarka WIC.

SU'AAL: Waa kuwee bakhaarada Walmart ee aqbalaya in alaab laga soo raro?

Jawab: Dhammaanba bakhaarada Walmart ee ku yaala gobolka Washington ayaa ogol WIC waxayna bixiyaan rarista alaabta.

SU'AAL: Ma jiraa cadad u go'an adeegashada onleenka ah?

Jawab: Maya, majiro cadad u go'an dalabka.

SU'AAL: Majiraa cadad u go'an rarista bilaashka ah?

Jawaab: Maya, kharashka rarista ayaa lagaa qaadi karaa. Ka qaybqaateyaasha WIC waxay u qalmaan rukumashada Walmart+ oo qiimo dhimis leh oo ay kamid yihiin raris bilaash ah oo dalab xadidan lahayn.

SU'AAL: Waa tee maalinta ugu danbaysa ee aan gudbisan karo dalabka onleenka ah ee keenista ama soo qaadista?

Jawab: Waa inaad dalabkaaga soo qaadataa inta lagu jiro muddada dheeftaada. Waxaan kugula talinaynaa inaad adeegato kahor maalinta ugu danbaysa dheeftaada.

SU'AAL: Walmart ma bixin kartaa badalka cuntada WIC haddii badeecadu ka dhamaato bakhaarka?

Jawaab: Haa, laakiin kaliya waa haddii aad doorato badalka aad rabto ee shay walba marka aad dalabka samaynaysay. Marka aad dalabkaaga ka eegto hubinta, waxaa lagu siin doonaa khiyaarka doorashada badalka.

SU'AAL: Yaan la xiriirayaa haddii dhibaato ka timaaddo dalabkayga WIC ee onleenka ah?

Su'aalaha Inta badan la iska weydiiyo Dalabka Onleenka ah

Jawab: Waxaad wici kartaa 1(800)-925-6278 ama booqan kartaa [Caawimaada - Walmart.com](#) (Ingiriisi ah).

SU'AAL: Ma dooran karaa wax ka badan hal Kaarka WIC ah haddii qoyskaygu dhowr xabo haysto?

Jawab: Maya, ma isticmaali kartid wax ka badan hal Kaarka WIC ah hal dalab oo onleen ah maadaama ay yihiin kaarar isku nooc ah. Waxaad isticmaali kartaa qaababka kale ee lacag bixinta sida Supplemental Nutrition Assistance Program (SNAP, Branaamijka Kaalmada Cuntada Nafaqada leh) Electronic Benefits Transfer (EBT, Xawilaadda Dheefta ee Electoroonigga ah), kaararka daynta, lacag bixinta, iyo wixii lamid ah. Waxaad u baahan tahay inaa dalab onleen ah oo gaar ah u gudbiso Kaar walba oo WIC ah.



DOH **961-1319** February 2025 Somali
Hay'addan waa hay'ad bixisa fursad loo wada siman yahay.
WIC cidna ma takoorto.

Si aad dukumiintigaan ugu heshid qaab kale, wac 1-800-841-1410.
Haddii aad tahay macaamiil dhagool ah ama aad maqal culus tahay, fadlan wac 711 (Washington Relay)
ama iimayl udir wic@doh.wa.gov.